Dadweynaha waxaa lagu martiqaadayaa in ay dadka la wadaagaan fikraddo ku saabsan waxbarashada oo lala leeyahay sharci dejiyayaasha kulanka ka dhacaya Dugsiga Sare ee Madison

Waalidiinta, macallimiinta iyo xubnaha ka tirsan bulshada ee haya fikraddo ku saabsan waxbarashada dadweynuhu waxay heli doonaan fursad ay wax kula wadaagaan kooxo laba dhinac ka socda oo ah sharci dejiyayaasha gobolka ee dhacdada ka dhacaysa Dugsiga Sare ee Madison.

Guddiga Wadajirka ah ee Ku meel gaarka ah ee u qaabilsan Guusha Ardayga, oo ah koox ka kooban 14 sharci-dejiyayaasha gobolka Oregon ayaa qaadan doono marag furka dadweyne 'public testimony' maalinta Khamiista ah, Sibtambar 27, laga bilaabo 7 ilaa 9 habeenimo, taasi oo ka dhacaysa goobta wax lugu soo bandhigo 'auditorium' ee Madison (2735 NE 82nd Ave.). Xannaanada carruurta ayaa la bixin doonaa, iyada oo la helayo turjumaad ah Isbaanish, Vietnamese, Chinese, Soomaali iyo Russian.

Dhacdadu waxay qayb ka tahay 10 meelood oo la joogsanayo taasi oo la xiriirta ku soo wareega gobolka halkaasi oo ay guddigu qaadanayso marag furka dadweynaha si ay uga caawiyaan sameynta qorshe lagu wanaajinayo waxbarashada dadweynaha iyo bixinta dhaqaale ku filan oo loogu talagalay dugsiyada.

"Waxaanu rabnaa in aan war ka maqalno dadka reer Oregon kaasi oo ku saabsan waxa ay rabaan marka ay noqoto dugsiyadooda K-12," ayuu sheegay Senator Tim Knopp (R-Bend), oo ah guddoomiye ku xigeenka guddiga, isaga oo ku sheegay war saxaafadeed. "Iyada oo la raacayo aragtidaasi, Xeer dejintu way shaqeyn kartaa iyada oo iskaashi la leh dugsiyada degmooyinka si ay abuuraan nidaam waxbarasho oo wax ku ool ah oo si wanaagsan ugu adeega ardaydeena."

Guddigu waxay ka kooban tahay xubno ka tirsan Golaha Wakiilada Oregon iyo Senate-ka, waxayna ku soo wareegayaan gobolka si ay qaataan marag fur tan iyo Maarso. Dhacdada Madison waa joogsigii sagaalaad ee joogsiyo ka kooban 10 oo gobolka lagu soo wareegayo.

Xubnaha ka tirsan dadweynaha waxaa lagu martiqaaday in ay marag furaan muddo laba daqiiqo ah qofkiiba. Xaashiyaha isdiiwaangelinta waxaa laga heli karaa goobta wax lugu soo bandhigo 'auditorium' laga bilaabo 6:30 galabnimo. Marag fur qoraal ah ayaa sidoo kale loo diri karaa guddiga iyada la isticmaalayo email jcss.exhibits@oregonlegislature.gov.

Xubnaha guddiga:

- **Guddoomiyeyaasha-wadajira** Senator Arnie Roblan (D-Coos Bay), Rep. Barbara Smith Warner (D-Portland)

- **Guddoomiye ku xigeenada:** Senator Tim Knopp (R-Bend), Rep. Greg Smith (R-Heppner)
- **Xubnaha senate-ka:** Alan DeBoer (R-Ashland), Lew Frederick (D-Portland), Mark Hass (D-Beaverton), Kathleen Taylor (D-Milwaukie), Kim Thatcher (R-Keizer)
- **Xubnaha aqalka:** Brian Clem (D-Salem), Julie Fahey (D-West Eugene/Junction City), Diego Hernandez (D-Portland), Sherrie Sprenger (R-Scio), Carl Wilson (R-Grants Pass)